

450



QORAAL MAGUURTO L. 5/1979

REPUBBLICA DEMOCRATICA SOMALIA

N. 10685 REB. ---

HESHIIIS KALA GADASHO GURI DAAR AH IYO XUQUUQDA KU SAAB
SAN DHIIKA UU KU DHISAN YAHAY OO DHAN.

-Maanta oo ah 2da Janaayo, Sanadka 1978, Xafiiska No-
taayaha Muqdisho, oo ku yaalla Luuqa Waddada SHEEKH-

-CABDULQAADIR SAQAAWADDIIN, Aniga oo ah Notaayo Dr. MU-
USE KUSEEN SADIQ, ahna Notaayo Muqdisho, Waxaa iigu

1) Jimid JAALLE XAAWA SAMANTAR MAXAMED oo ku dhalatay Ja-
maama 1923, deggan Xamar, ahna Soomaali, lehna W. AQ.
L. 71270, Dowladda Hoose ee Muqdisho (iibiso);

2) - JAALLE CABDIKARIIN SH. KUSEEN CUSMAAN ku dhashay
Xamar, 1935, ahna Soomaali, lehna W. AQ. L. 6752 Dowlad-
da Hoose ee Muqdisho (gate);

Jaalleyaashaas aan kor ku soo sheegay aniga oo aqoon-
saday ayaga oo ka tansuleen kaalmo marqaatiyeed ani-
guna aan ku waafaqay waxaybi weydiisteen inaan u qoro
Heshiiskaan ay iigu caddeyeen inta soo socota oo ah:

1) - Waxaa la hormarinayaa in JAALLE XAAWA SAMANTAR MA-
XAMED Gaar ahaan iigu caddeysay inay iska leedahay
Guriga daarta ah oo ku yaalla Muqdisho, Degmada Boon-
dheere, kana kooban 2-qol oo la jiipto, Jiko iyo Mus-
qal, Syo Garaash, Soqdimihiisuna kala yihiin: -Waqooyi
waxaa ka xiga CABDI AADAN, Koofur MAXAMUUD KOOGAAR, Gal-
beed waxaa ka xiga Waddo laami ah, Barina waxaa ka xi-

Vertical handwritten notes and stamps on the right side of the page, including a signature and various administrative markings.

120



ga JAALLE AAMIIN, Wuxuuna Gurkigaasi ku dhisan yahay
Dhul Demaanyaale ah oo Gabbarkiisu yahay 964Mq. - - - -

2)- In misna JAALLE XAAWA SAMANTAR MAXAMED ii sii cad-
deysay inay Gurigaas ka iibisay kuna wareejisay JAALLE
CABDIKARIIN SHEEKH XUSEEN CUSMAAN, oo asaguna Heshiis-
kaan ku caddeynaya inuu Gurigaas ka gatay kana aqbalay
Iibisada; - - - - -

3)- In labada dhinac ee Derbigaas kala iibsaday ay ii
wada caddeyeen in qiimaha Gurigaas lagu kala iibsaday
uu yahay lacag ah Sh. So. 60,000/- (lixdan kun oo Shil-
lin), lacagtaas oo gatahu uu dhamaanteed wada siiyey
Iibisada, JAALLE XAAWA SAMANTAR MAXAMED oo ayaduna He-
shiiskan ku caddeynaysa inay ka qaadatay lacagtaas. -

4)- In muddada Maanta laga billaabo ay milkiyadda la-
haanta Gurigaas iyo Xaquuqda la xariirta dhulka uu ku
dhisen yahay u wareegtay Gataha JAALLE CABDIKARIIN -
SH. XUSEEN CUSMAAN, oo qaadan doona wixii Nacfi ah oo
ka yimaada iskana bixin doona wixii Waajibaad Ganshu-
reed ah ee hadda ka dib lagu soo sheegto. - - - - -

5)- In markale ay JAALLE XAAWA SAMANTAR MAXAMED ii cad-
deysay inay ayadu iska leedahay Guriga Daarta ah ee kor-
laga soo sheegay rahmadna uusan ku jirin, si kalena -
qof wax ugu sheegan karaa uusan, isla markaasna ay -
Fasax Banaan ka haysato Wasaaradda Maaliyadda sida ku
cad Fasaxyada Banaan ee Xafiiska faraca Ganshuuraha -

Repno: 84577/MPN/2023, W.DH: (964) - MG
Tr. 03/04/2023

Toosan N. 393 ee 19.12.78 iyo midka Waaxda Canshu-
raha Berriga N. 3026 ee 19.12.78 ee Muqdisho. - - - -

6)- In wixii aan Heshiiskaan ku qorayn loo raacanayo
sida sharcigu qabo. - - - - -

7)- Heshiiskaan oo ku qoran hal Xaashi oo labo bog -
buuxdo iyo inta ku qoran boggaan saddexaad waxaa qo-
ray qof aan aniga Notaayaha ahu aaminsanahay, waxaan-
aan u aqriyey Jaallayaashaas waxayna ii caddeyeen in
uu ugu qoran yahay siday rabeen waana ila wada saxii-
keen. - - - - -

1)- HAWO SAMATAR
2)- *Mad. Kani Sadiiq*

NOTAAYAHA



(MUSSE XUSEEN SADIQ)

Musse Xuseen Sadiq

